Farsamada gacanta

Madoonaysaa in aad ahaatid qof fikrado cusub iyo daadal waxbarashadeed oo aad u badan leh, kuna shaqeeyana, islamarkaana is ticmaala gacmihiisa?
Madoonaysaa in aad mustaqbalka aad lahaatid shirkad adigu aad leedahay?
Madoonaysaa in aad isku daydid in aad shaqeysid inta aad waxbarashadu kuu socoto?
Madoonaysaa in aad lahaatid waxbarasho wanaagsan oo isugujirta casharo iyo tijaabooyin?
Madoonaysaa in aad wax kabadeshid islamarkaana sii horumarisid farsamooyinkii hore ee lagu sameenjiray farsamada gacmaha?
Sidaas daraadeed waxbarashadan farsamadagacantu waa mid adiga kugu haboon.

Waxbarashadan farsamada gacanta waxaad barandoontaa, habka shaqooyinka loofuliyo,masuulnimo,dhaqaalaha,suuqraadin iyo suuqgeeyn,iyo islaxidhiidhinta.Laakinse Waxaa suurtogal noqonkarta haddii aad dooratid waxbarashadan farsamada gacanta, in aad ogtahayba waxa aad ku takhasusidoontid, kaas oo aad dooneysid in aad siibaratid, islamarkaana aad noqotid qof ku wanaagsan.Waxaa intaas soo raaca in aad waxbarashadan aad ku horumarindoontid hab qaab farsameedka wax loosameeyo,iyo noocyada kaladuwan ee renjiyada.

In aad shaqeysid ama aad waxbarashadaada sii wadatid.

Haddii aad Waxbarashadan farsamadagacanta aad dooratid,waxaa suurtoobi karta in aad shaqo doonatid kadib marka waxbarashada dugsiga sare aad qalinjabisid.Waxayna ku xidhantahay hadba waxa ay tahay waxbarashadaadu, iyo casharada aad qaadatay,iyo sida uu yahay suuqa shaqada ee ku wajihan waxbarashada aad baratay ee farsamada gacanta ah, iyo sida aad ugu wanaagsantaha waxa aad sameysid.Waxaa dhacda in marka hore aad sameysid tababar farsameed, kaas oo noqon kara sanad, ama in kabadan.Waxaad qaadan doontaa lacagta tababar xirfadeedka ah, waxaana ku hagi doona ama aad raacidoontaa dad ka shaqeeya qaybahaas, ku waas oo aad kabarandoontid kana faa ideysan doontid.Waxaa intaa dheer in ay leeyihiin khibrad iyo waayo aragnimo aad u dheer, mudo aad u dheerna way ka soo shaqeeyeen farsamadan.

Si haddaba aad u heshid fursad ah in aad ku shaqeysid farsamadan gacanta ee aad xiiseenaysid, waxaa suurtogal noqonkarta in aad wax barashadaada aad sii wadatid kadib marka aad dugsigasare aad dhameeysid. Waxaad doorankaraysaa waxbarashada farsamada gacanta ah, waxaadna ka dhigankartaa dugsiyada farsamada gacanta, ama jaamacadaha.Waxaa jira skuulo aad u badan oo ah iskuulo waxbarashadoodu gaartahay waxa laga barto iyo waxbarashadooduba, waxaana dhacda in galitaanka ama helitaanka iskuuladaasi ay adagtahay.

Waxaad la tashankartaa, su´aalikaraysaana qofka u qaabilsan waxbarashooyinka dugsiyada (Studie- och yrkesvägledare) waxbarashooyinka dugsiga sare ee aad dooneysid in aad baratid.

Iyo habka aad u dalbankareysid waxbarashada aad jeceshahay ama aad xiiseyneysid in aad baratid.

Shaqooyinka aad helikaraysid.

Tusaale ahaan shaqooyinka farsamooyinka gacanta, waxaa kamid ah sida, sameeynta doonyaha,timexiire ama timejare, sameenta iyo afuufitaanka quraaradaha ama dhalooyinka.dahable,sameenta xayeysiiska (moodada)faryaame ama nijaarka,dawaarleh,sacadsameeye.

Waxbarashada guud waxa ay ka koobantahay.

Waxbarashadan farsamada gacantu wax ayka koobantahay casharo. Casharo qaarkood waa qasab in dhamaan ardayda dhiganaysa dugsigasare ey qaatan casharadaas. Waxaa jira laakin casharo kale oo ugaar ah ardayda dhiganaysa farsamada gacanta Waxaa intaas sooraaca in ay jiraan casharo kale oo adigu gooni aad u doorankartid

Farsamada gacantu malaha takhasusguud oo ka wadasiman dhamaan iskuulada oo dhan. Taas macnaheedu wax aytahay iskuulkasta isga ayaa qorsho waxbarashadeed oo madaxbanaan u leh. Waxaad weydiin kartaa qofka u qaabilsan waxbarashooyinka dugsiyada (Studie- och yrkesvägledare) meesha aad waxbarashadan farsamadagacanta ee aad jeceshahay aad kadhigankartid.

Xidhiidhka suuqa shaqada.

Waxbarashadan farsamada gacanta dugsigasare inta aad kujirtid waxa aad xidhiidh aad la lahaan doontaa suuqa shaqada.Waxa aad leedahay oo aad sameyndoontaa 15isbuuc ama wiig oo tababar xirfadeed ah inta aad kujirtid waxbarshadaada. Tababarkana waxa aad ku sameeyndoontaa goobaha shaqooyinka. (APU). Waxaanad halkaas aad ka baran doontaa, oo aad ka heli doontaa aqoono ah sida farsamada gacanta ee aad baranaysid aytaha, ama loogu shaqeeyo, waxaa kaloo oo aad barandoontaa waxa aad jeceshahay oo aad xiiseyneysid in aad baratid kuna wanaagsanaatid, kuwaas oo aan kuu saamaxeeynin ama kuu suurtoobin in aad kabaratid dugsiyadac aadiga ah. islamarkaana waana hab aad xidhiidh aad ku yeelan kartid, xidhiidhadaas oo aad mustaqbalka aad u adeegsankartid marka aad shaqooyin aad radsaneysid.Haddii aad dooneysid in aad dalkale aad tababar xirfadeed aad ku sameysid, waxaa markaa suurtogalnoqonkarta in aad heshid fursadaa tababarka dibada ah.

Mustaqbalka iyo shaqooyinka

Way adagtahay in la saa-daaliyo in aad si adag ama sifudud shaqo aad ugu heshid xirfadan marka waxbarashada farsamada gacantu ay kuu dhamaato. Laakinse waxa ay ku xidhantahay hadba farsamada gacanta ee aa aad baratay. Waxaanad u diyaar noqotaa, kuna talagashaa in aad meelo fog-fog oo kaladuwan aad u safridoontid si aad shaqo aad u heshid. Waxaa dhicikarta in xataa aad adigu aad furatid shirkado aad adigu leedahay,marka aad dugsiga sare ka baxdid. Waxaa laga yaabaa in aad heshid ururo ka shaqeeya farsamada gacanta oo aad

wadashaqeysiin. Weydii och kawareyso dadka iminka shaqadaheysta ee ku jira suuqa shaqooyinka ee farsamada gacanta sida uu yahay shaqooyinka farsamada gacanta.